# Shardiga dhaqaalaha nololmaalmeedka ee ku xiran reer isu keenidda qofka la siiyay ama helay sharciga qaxootinnimada

Tilmaanbixintaan ama hagistaan waxaa ay adiga ku khuseysaa, haddii aad dalkan Finland ka qaadatay sharciga qaxootinnimada, ama adiga laguu oggolaaday in aad ka mid noqoto qaxootiga ay Finland soo qaadatay.

Xubnaha qoyskaagu waxaa ay Finland ka soo codsan karaan sharciga degganaanshaha dalka, kaasoo lagu saleeyay in adiga aad Finland ku leedahay sharciga degganaanshaha dalka.

### Xubnaha waaweyn ee qoyskaaga saddex bilood gudahood ayay codsiga sameyn karaan, iyadoo aan lagu xireyn shardiga ah dhqaalaha nololmaalmeedka ee sugan

Haddii reerkaagu uu sameysmay ama aad dhisatay kahor intaadan Finland imaan (qaxooti ahaan) ama kahor inta aan laguu oggolaan in aad ka mid noqoto qaxootiga la soo qaato ee Finland ay oggolaatay (kiintiöpakolainen), xubnaha qoyskaagu waa ay codsan karaan sharciga degganaanshaha dalka **iyadoo aanu la socon shardiga ah sugista dhaqaalaha nolosha ee saddexda bilood ah.** Waqtiga waxaa laga soo bilaabayaa maalinka aad heshay wargelinta ku saabsan go'aanka siinta qaxootinnimada ama kan oggolaanshaha ka mid noqoshada qaxootiga la soo qaato.

Xubnaha qoyskaagu waxaa sidoo kale ay saddexdaa bilood kaddib codsan karaan sharciga degganaanshaha dalka ee ku salaysan xiriirka qoysnimo. Markaa **waa in dhaqaalaha nolosha ee qoyska uu noqdaa mid la sugay.**

### Xubnaha cusub ee qoyska waa in dhaqaalaha noloshooda uu yahay mid sugan.

Haddii reerkaagu uu sameysmay kaddib markii aad Finland timid (qaxooti ahaan) ama aad ka mid noqotay qaxootiga la soo qaato ee ay Finland oggolaatay (kiintiöpakolainen), **nolosha dhaqaalaha ee qoyska waa in ay tahay mid sugan.**

## Sidaan soo socota ayay xubnaha qoyskaagu ku codsan karaan mudada saddexda bilood gudaheed ah:

Xubnaha qoyskaagu waa in ay xereeyaan codsigooda sharciga degganaanshaha dalka kahor inta aanay imaan dalka Finland. Codsiga waxaa isagoo waraaq ahaan laga xereyn karaa safaaradda ama xarunta codsiga sharciga degganaanshaha, amaba isagoo elegtoroonig ah ayaa laga sameyn karaa adeegga loo yaqaan Enter Finland.

## Waa kuwee xubnaha qoyskaagu

Xubnaha qoyska waa

- xaaskaaga
- lammaanahaaga aad isu diiwaangashan tihiin
- xaaska ama ninka aad wada nooshihiin (aydaan si sharci ah isu qabin)
- waalidka dhalay ilmaha da'doodu ka yar tahay 18-ka sano
- ilmaha ka yar 18-ka sano ee aan weli guursan

## Xereynta codsiga waraaq ahaanta ah

Isu diyaarinta  codsiga sharciga degganaanshaha waa in si dhakhso ah loo bilaabaa, islamarka aad adigu hesho sharciga degganaanshaha. Waxaana dhici karta in xubnaha qoyskaagu ay u baahdaan fiiso ama dal kuggal, si ay u yimaadaan safaaradda ama xarunta codsiga sharciga degganaanshaha oo ay codsigooda uga xereystaan. Xubnaha qoyskaaga iyaga ayaa laga rabaa in ay ka taxaddaraan in ay ku yimaadaan waqtigii loogu talaggalay si ay codsiga u xereystaan.

Qoyskaaga waxaa ku waajib ah in ay iyagu ka hubsadaan bogga internetka ee wasaaradda arrimaha dibadda ee Finland  finlandabroad.fi, qaabka codsiga loo sameynaayo iyo halka laga xereynaayo, iyo sida loo qabsado ballanka ku saabsan codsi xereynta. Waaxda socdaalku wax saameyn ama awood ah kuma lahan halka iyo goorta ay xubnaha qoyskaagu xereysan karaan codsiga. Dhammaan dadka codsanaaya sharciga degganaanshaha dalka waa in ay goobta codsiga laga xereynaayo wada tagaan, xitaa carruurta waa in la geeyo.

**Haddii codsi xereysashada aanay u baahneyn wax ballan qabsasho ah:**

Haddii codsi xereysashada aan loo baahneyn wax ballan qabsi ah, waa in codsiga lagu xereeyaa muddo saddex bilood gudahood ah.

**Haddii codsi xereysashadu ay u baahan tahay in ballan la qabsado:**

Haddii codsi xereynta awgeed ay tahay in aad ballan qabsato, xubnaha qoyskaagu waa in ay sida ugu dhakhsaha badan ugu dambeyn mudada saddexda bilood gudahood ah, ay kula xiriiraan safaaradda ama xarunta codsiga sharciga degganaanshaha ee ay codsiga ka xereysanayaan. Waa in ay ballan ka qabsadaan si ay codsiga u xereeyaan.

Marka ay ballanka qabsanayaan, waa in ay sheegaan oo safaaradda ama xarunta codsiga sharciga degganaanshaha ku wargeliyaan dhammaanba shakhsiyaadka doonaaya in ay codsadaan sharciga degganaanshaha dalka.

Waxaa ku waajib ah in ay sheegaan:

- magacyada dhammaanba codsadayaasha, taariikhada dhalashada ee saxda ah iyo jinsiyadahooda ama dhalashadooda
- adiga magacaaga, taariikhda dhalashadaada, jinsiyaddaada, lambarkaaga macmiilka ee Waaxda socdaalka.

Haddii xubnaha qoyskaagu ay sameeyaan sida hore loogu soo siiyay tilmaanbixinta, laakiin aysan codsiga ku xereyn karin mudada saddexda bilood ah ee loo qabtay  gudahood, sababtoo ah xilliga ballanka loo qabtay awgiis, si kasta oo arrinkaas uu sidaa yahay waa ay

codsan karaan sharciga degganaanshaha ee xubnaha qoyskaada ahaan ah. Si kastaba waa in xubnaha qoyskaagu ay qabsadaan waqtiga ugu horreeya ee ay suurtaggalka tahay in ay ballanka helaan, ayna u isticmaalaan waqtigaas codsi xereysashadooda.

Haddii codsi xereyntu ay ku dib dhacdo sabab kale oo aan ahayn mid ay sababeen hawlwadeennada dawladda Finland, mudada cayiman ee la isu qabtay ee saddexda bilood ah, waxba lagama beddeli karo.

### Codsi ka xereysashada adeegga Enter Finland

Xubnaha qoyskaagu waxaa ay sidoo kale codsigooda ka xereysan karaan adeegga internetka ee Waaxda socdaalka ee (enterfinland.fi). Codsiga elegtorooniga ah waa in lagu sameeyaa mudada saddexda bilood gudahood ah, si aan laguu weydiinin shardiga ah sugista dhaqaalaha nolosha.

Markii ay xubnaha qoyskaagu codsiga ka sameynayaan adeegga internetka ee Waaxda socdaalka ee Enter Finland, waxa ku waajib ah in ay caddeeyaan aqoonsigooda shakhsiyadeed iyagoo dalka dibaddiisa jooga. Tilmaanbixinta arrinkaas ku saabsan waxaa ay ka helayaan adeegga Enter Finland.

## Codsiyadu waa kuwo lacag ah

Codsigu waa mid lacag ah. Qiimaha codsiyada waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Waaxda socdaalka ee migri.fi.

## Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Waaxda socdaalka

Warbixinta dheraadka ah ee ku saabsan codsiga sharciga degganaanshaha dalka, waxaad ka heleysaa bogga internetka ee Waaxda socdaalka ee migri.fi.